**Soo Koobidda Maamulka**

Intii lagu jiray kulankii sharci dejinta ee 2019-kii, sharci dejinta ayaa ansixisay, iyada oo Guddoomiyaha Gobolkuna saxiixday Sharciga Senate-ka 577 (SB 577). Qaybta 9 ee sharcigu waxay uga baahan tahay Guddiga Caddaalada Dembiyadda ee Oregon (CJC) in ay dib u eegaan dhammaan xogta ku saabsan dembiyada eexda iyo dhacdooyinka eexda ee aan dembiga ahayn si loo soo sheego natiijada sanad walba Luulyo 1. Tani waa warbixin sanadeedkii lixaad waxayna ka hadlaysaa xogta ku saabsan dembiyada eexda iyo dhacdooyinka eexda ee aan dembiga ahayn ee ka dhacay Oregon intii lagu jiray taariikh sanadeedkii 2020 ilaa 2024. Qof kasta oo daneynaya in uu eego warbixinta oo dhan wuxuu sidaasi sameyn karaa isaga oo nuqul ka codsanaya CJC oo laga helo 503-378-4830 ama iyada oo la galayo meeshan la sii gelayo: https://www.oregon.gov/cjc/CJC%20Document%20Library/SB577ReportJuly2025.pdf. Weydiimaha guud ee ku saabsan warbixintani waa in lagu hagaajiyo CJC oo laga helo 503-378-4830. Su'aalaha gaarka ah oo ku saabsan waxa ay ka kooban tahay warbixintani waxaa lagu hagaajin karaa Ryan Keck, Agaasimaha Fulinta ee Ku meel gaarka ah ee CJC, oo laga helo 503-871-1029 ama Ryan.Keck@cjc.oregon.gov.

Warbixinta buuxdaa waxay muujinaysaa xog kooban iyo falanqeynta dhabta ah ee dembiyada eexda iyo dhacdooyinka eexda ee aan dembiga ahayn (oo si wadajir ah loogu yaqaano "bias-motivated" ama "BM" reports/acts/experiences) oo laga helay Khadka Ka Jawaabida Eexda (oo loo yaqaan "BRH" ama "Hotline") oo ay aasaaastay Waaxda Caddaalada ee Oregon (ODOJ) waxaa ka go'an caawinta dhibanayaasha, markhaatiyaasha, iyo soo sheegayaasha kale ee dembiyada eexda iyo dhacdooyinka eexda ee aan dembiga ahayn. Natiijooyinka xogta Khadka tooska ah waxay tilmaamayaan warbixinta eexda-ku dhisan "bias-motivated reports" ee <u>bilawga ah</u> si looga fogaado tirinta xad-dhaafka ah ee warbixinta badan. [1] Intaasi waxaa dheer, in warbixintu muujinayso xog ku saabsan dembiyada eexda la xiriira oo laga soo qaatay Nidaamka Warbixinta Ku saleysan Dhacdada Qaranka (NIBRS) ee Oregon oo ku yaala Booliska Gobolka Oregon (OSP), iyo xogta caddaalada dembiyadda la isku daray (CJ), taasi oo isku daraysa xogta xiritaanka dadka 'arrest' oo ka socota Nidaamka Xogta ee Fulinta Sharciga (LEDS) ee qaranka, xogta maxkamadda ee dembiyada eexda oo ka socota nidaamka xogta Odyssey ee Oregon, xogta isku xumida iyo xukunka ee dembiyada eexda oo ka socota Waaxda Asluubta ee Oregon (DOC), oo ay weheliso xogta qareenada degmada (DA Data) oo ku saabsan ciqaabta gudbinta dembiyada eexda iyo kiisaska si loo abuuro hal saf oo ah macluumaadka heerka kiiska oo loogu talagalay eedaysane kasta oo la gudbiyo ama lagu soo eedeeyay dembiga eexda.

<u>Natiijooyinka Muhiimka ah</u>

- Muddadii 5-sano ka koobnayn 2020 ilaa 2024 dadka u dooda BRH ayaa la beegsaday kuwaasi oo ahaa 390 *dhacdooyinka eexda ah*. Hubaashii, waxaa jiray korodh dhan boqolkiiba 165% oo ah dhacdooyinka eexda oo lagu beegsanayo u doodayaasha Khadka tooska ah sanadkii 2024 marka loo eego sanadkii hore. Lama oga ilaa heerka uu gaarsiisan yihiin u doodayaasha kale ee dhibbanaha dembiga ee sidoo kale ay dhacday in ay la kulmaan mid taasi la mid ah.
- Ka dib korodh sanadle ah oo xiriir ah oo jiray laga soo bilaabo 2020 ilaa 2023, warbixinta eexda-ku dhisan ee loo soo gudbiyay Khadka tooska ah <u>ayaa hoos ugu dhacday boqolkiiba 7%</u> (2,932 marka loo eego 2,726) sanadkii 2024, iyada oo sababtu tahay boqolkiiba 24% hoos u dhac ku yimid warbixinta *dembiga eexda* (fiiri Shaxanka A1 ee Lifaaqa A). *Ogow*, xogtii sanadka 2024 ma aysan helin culayska shaqada dheeraadka ah ee saaran dadka wax u dooda iyada oo sababtu tahay farsameynta 2,231 email oo spam ah (tusaale, email aan kala caddeyn, oo macno darro ah) iyo

[1] Xogta Khadka tooska ah 'Hotline' ee lagaga hadlay warbixintani ayaa diiradda saareysa warbixinta eexda-ku dhisan ee <u>bilawga ah</u>, dhacdooyinka eexda iyo dembiyada eexda. *Warbixinta Soo noqnoqotay, Dembiyada Aexda/Nacaybka Lama Buuxin, Eex Ka dhan ah Dabaqad Aan La dhowrayn, iyo* warbixinta *La awoodi waayay In la go'aamiyo* ayaa lagaga hadlay Tirooyinka 1-3, iyo Shaxanada A1-A8 ee Lifaaqa A oo lagu qeexay Go'aaminta Eexda.

wicitaanada kale oo aan eexda la xiriirin/dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka/beenta ah/wax dhibaateynaya (14 saacadood toddobaadkii) iyo u jawaabida warbaahinta iyo codsiga xogta dadweynaha (8 saacadood toddobaadkii).

- Hoos u dhaca 2024 ee warbixinta eexda-ku dhisan ma ahayn mid is waafaqsan guud ahaan qaab-dhismeedka kooxaha. Warbixinta eexda-ku dhisan ee dhibbanayaasha Dadka Madow, Dadka dhulka loogu yimid, iyo dadka midabyada kala duwan leh (BIPOC) (marka laga reebo dadka Aasiyaanka), iyo dhibbanayaasha dadka aan ku dhaqmin jinsiga 'gender non-conforming' ayaa hoos ugu dhacay boqolkiiba 16% iyo 34% hadba sida ay u kala horreeyaan. Taasi beddelkeeda, warbixinta eexda-ku dhisan ee haweenka, dadka caddaanka ah, dadka Aasiyaanka ah iyo dhibbanayaasha da'doodu tahay 60 ama ka weyn ayaa kordhay boqolkiiba 18%, 105%, 46% iyo 14%, hadba sida ay u kala horreeyaan iyada oo sababtu tahay rabitaanka dadkan oo kordhay ay wax ugu soo sheegayaan Khadka tooska ah (fiiri Shaxanka 1).
- Dhiirigelinta falalka eexda-ku dhisan way kala duwan yihiin marka loo eego qaab-dhismeedka dhibbanayaasha (fiiri Shaxanka 2 iyo A15 ee Lifaaqa A):
    - 96% (n = 444) oo ah dadka Madow/Maraykanka Madow 87% (n = 179) oo ah dadka Aasiya ka soo jeeda, boqolkiiba 76% (n = 233) oo ah Hisbaanik, iyo boqolkiiba 85% ee (n = 29) oo ah dhibbanayaasha AI/AN ayaa la beegsaday iyada oo sababtu tahay eexda isir-diidka ah, iyada oo in yar la beegsaday iyada oo sababtu tahay si qaldan oo loo aqoonsaday jinsigooda ama beegsi beddel ah (98%, 79%, 99% iyo 90%, hadba sida ay u kala horreeyaan, oo lagu beegsaday jinsiga ay isku aqoonsan yihiin). Dhibbanayaasha caddaanka ayaa la beegsaday iyada oo sababtu tahay dookha galmo (72%) ama eexda aqoonsiga jinsi ahaaneed (64%), iyada oo in yar la beegsaday iyada oo sababtu tahay eex ka dhan ah caddaanka (n = 12; 5% oo ah dhibbanayaasha caddaanka).
    - Ku dhawaad kala bar dhibbanayaasha ragga iyo haweenka ayaa la beegsaday iyada oo sababtu tahay isir-diidnimo'; saddex meelood meel dhibbanayaasha haweenka ah ayaa sidoo kale la beegsaday iyada oo sababtu tahay eexda dookha galmo; dadka leh jinsi aan la shaacin ayaa la beegsaday iyada oo sababtu tahay in la diidan yahay dal asal laga soo jeedo (44%) iyo eexda isir-diidka (39%); iyo dadka aan ku dhaqmin jinsiga 'gender non-conforming' oo la beegsaday iyada oo sababtu tahay diidmada aqoonsiga jinsi ahaaneed (89%) iyo eexda dookha galmo (55%).
- Hay'adaha fulinta sharciga (LEA-yada) ayaa boqolkiiba 58% warbixinta eexda-ku dhisan oo intii hore ka yar u soo gudbiyay the BRH sanadkii 2024 (n = 132), marka la barbardhigo 2023 (n = 315), inkasta oo NIBRS ay ka warbixisay tiro isku mid ah oo dhibbanayaasha dembiyada eexda ee labada sanaba (n = 370; fiiri Tirada 9 iyo Shaxanka 5). LEA-yada waxa kaliya oo looga baahan yahay in ay dhibbanayaasha dhacdooyinka eexda u soo gudbiyaan Khadka tooska ah, loogamana baahna in ay u warbixinta BM si toos ah ugu gudbiyaan Khadka.
- 966 oo ka mid ah kiisaska leh gudbinta ama isku la isku soo oogay dembiga eexda oo ka soo bilaabma 2020 ilaa 2024, kiisas dhan 649 (67%) ayaa la gudbiyay oo leh isku soo oogida Bias I/II, 108 (11%) ayaa la gudbiyay oo leh kaliya isku soo oogida aan eexda ahayn, 195 (26%) ayaa la diiday/aan la gudbin iyada oo 14 (1%) oo hawshoodu socoto (fiiri Shaxanka A55 ee Lifaaqa A).
    - 757 kiis oo la gudbiyay, boqolkiiba 62% ayaa keenay xukun dhacay (tusaale, la qirtay dembi, ay xukuntay xeerbeegti ama maxkamadeeyay garsoore 'bench trial', ama heshiis qirasho la gaaray), oo ah ugu yaraan hal eex oo la isku soo eedeeyay (34%) ama mid aan eex ahayn (28%), iyada oo boqolkiiba 20% ay furan yihiin ama sababtay in aanu xukun dhicin (tusaale, waa la soo gunaanaday iyada oo ay jireen tanaasul madani ah/la laalay, ama aysan jirin cabasho, ama dembi la isku waayay 'acquittal'/go'aanka maxkamadda oo ah in dembi la galin 'not guilty disposition'). Heerarka xukunka la riday ee kiisaska la gudbiyay sanadkii 2023 (61%) iyo 2024 (40%) ayaa la filayaa in ay kordhaan bilaha soo socda marka kiisaska furan (26 iyo 90, hadba sida ay u kala horreeyaan) loo soo gunaanado (fiiri Shaxanka 18 iyo Tirada A1 ee Lifaaqa A).
    - 469 oo ka mid ah eedaysanayaasha leh xukun la riday oo eex ama aan eex ahayn, oo lagu daray boqolkiiba 17% ayaa lagu xukumay xabsi kali ah (3%) ama uu weheliyo kormeerka xabsiga ka dib (14%), boqolkiiba 7% aya lagu xukumay jeel kaliya, iyada oo ku dhawaad saddex meelood

meel ay heleen jeel korka la iskala soconayo ‘probation’ (32%) ama in korka la iskala socdo ‘probation’ kaliya (31%; fiiri Shaxanka 19)

Talooyinka CJC

1. Cilmi-baaris dheeraad ah ayaa loo baahan yahay si loo go’aamiyo haddii u doodayaasha kale ee dhibbanaha dembiga (ahayn-ODOJ) iyo adeeg bixiyayaasha ay sidoo kale la kulmayaan dhibaateyn heerkeedu sarreyso; xogta loo baahan shaqada ka hor ayaa lagu talin karaa in ay noqoto dabaqad la dhowrayo oo dheeraad ah.
2. Iyada oo la eegayo korodhka soo sheegaha xaalada dembiilaha (tusaale, spam-ka, dhibaateynta, ama xiriirada kale ee lagu beegsado ama looga leexiyo shaqaalaha BRH waajibaadkooda taageero ee dhibbanaha), ODOJ waa in ay sii wadaa in ay dib eegis ku sameyso siyaasadaheeda taageerada shaqaalaha ee jira, ammaanka iyo fayo-qabka hadba sida loogu baahdo, iyo in ay ka faa’iidaysato habkeega tooska ah ee emaylada aan la rabin ‘spam folders’.
3. ODOJ waa in ay tixgelisaa abuurista boos shaqaale oo dheeraad ah si ay Isku duwaha Jawaab ka bixinta Dembiyada Nacaybka uga caawiso warbaahinta iyo ka jawaabida codsiyada diiwaannada dadweynaha (PRRs) ee kale; baaritaanka, dib u eegista iyo gelinta diiwaanka emaylada xaalada soo sheegaha dembiilaha; iyo bixinta taageero loogu talagalay hawlaha maamulka ee dheeraadka ah.
4. Sharci-dejinta Oregon waa in ay tixgelisaa iska reebida xogta dadweynaha ee loogu talagalay shaacinta dhibbanayaasha eexda – ee u dhigma kuwa la siiyo dadka ka badbaaday rabshadaha qoyska, ka ganacsiga dadka iyo shaacinta weerarka dhanka galmada ee hoos yimaada ORS 147.115(1)(b). Dib u eegis kasta waa in lagu daraa ololaha wacyigelinta warbaahinta ee ODOJ iyo macluumaadka si loogu xaqiijiyo dhibbanayaasha in waxyaabaha u gaarka ah la ilaalin doono, si loo hagaajiyo heerarka warbixinta.
5. Cilmi-baaris ayaa loo baahan yahay si loo go’aamiyo sababta soo sheegida warbixinta eexda-ku dhisan ay hoos u dhacayso (tusaale, isbeddelada sharciga federaalka ee degdega ah; cabsi laga qabo shaacinta ahaanshaha dhibbane oo la wadaago/la sii daayo; eexda oo sidoo kale noqota wax maalin kasta ah oo la iska dhaafo oo aysan wax dhibbin in la soo sheego; jahwareer ka taagan baaxada ODOJ vs U.S. DOJ, mas’uuliyadaha, iyo nuglaanshaha xogta). Sharci-dejintu waa in ay tixgelisaa maalgelinta ODOJ si loo ballaariyo wacyigelinta warbaahintooda si bulshada loo baro adeegyadeeda marka la barbardhigo U.S. DOJ iyo siyaasadaha codsiga xogta.
6. LEA-yada loogamana baahna in ay u warbixinta eexda-ku dhisan u soo gudbiyaan BRH. Inta ay LEA-yadu abuurayaan oo ay farsameynayaan siyaasadahooda gudaha si ay buuxiyaan shuruudaha SB 577, baarayaan tirada sii kordhaysa ee warbixinta eexda-ku dhisan ee ay dhammeystirayaan waajibaadkooda maamul ee gudaha, gudbinta BRH waxaa dhici karta in ay noqoto tallaabo maamul oo dheeraad ah oo ka baxsan awooda LEA-yada ilaha hadda jira. Cilmi-baaris ayaa loo baahan yahay si loo xaqiijiyo in u gudbinta dhibbanaha ee BRH ay tahay mid socota, inkasta oo uu hoos u dhac ka jiro gudbinta warbixinta BM.